

Minnesota waxay leedahay tiro sharciyo cusub ah oo ballaarinaya xorriyadda codbixinta!

SOO CELINTA CODBIXINTA

Hadda, dadka reer Minnesota ee ka tagay xabsiga waxaa lagu dari doonaa dimuqraadiyaddeenna. Diiwaanka dembiile kuma saameeyo xuquuqdaada codbixinta, ilaa aad hadda ku xiran tahay adigoo ku xukuman dembi weyn.

Haddii aadan xiraneyn, oo ay ku jiraan haddii aad ku jirto tijaabo ama damaanad, ama aad deyn ku leedahay, waxaad u qalantaa inaad codeyso.

DIWAANGELINTA CODBIXIYAHA TOOSKA AH

Sanadka 2024, Minnesota waxay dhaqan gelin doontaa diiwaangelinta codbixiyaha tooska ah. Marka la meel mariyo, kuwa codsanaya ogolaanshaha barashada, laysanka darawalnimada ama aqoonsiga gobolka, sidoo kale waa la diiwaangelin doonaa haddii ay buuxiyaan dhammaan shuruudaha uqalmitaanka, oo ay ku jiraan muwaadinimada. Intaa waxaa dheer, inay fududeyneyso codbixinta, taniwaxay u oggolaan doontaa saraakiisha doorashooyinka inay hagaajiyaan habka cusbooneysiinta diiwaanka codbixiyeyaasha.

Reer Minnesota waxay awoodi doonaan inay ka baxaan diiwaangelinta codbixinta 20 maalmood gudahooda ka dib marka la farsameeyo diiwaangelintooda

TAARIIKHAHA 2026

DOORASHADA AASAASIGA

Talaada, 11ka Bisha 8aad (August)

MAQNAANSO KU CODAY

Coday adigoo boostada ku soo diraya ama qof ahaan imanaya 18ka Bisha 9aad (September) ilaa 2da Bisha 11aad (November).

ISDIIWAANGELI SI AAD U CODAYSO

Hory isdiiwaangeli ugu dambayn 13ka Bisha 10aad (October) si aad waqti u hesho Maalinta Doorashada.

MAALINTA DOORASHADA

Talaada, 3da Bisha 11aad (November)

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov • 1-877-600-VOTE



...ka timid horay

DIWAANGELINTA HORE EE DADKA DA'DOODU TAHAY 16 ILAA 17 SANO

Hadda, dadka reer Minnesota ee da'doodu tahay 16 ilaa 17 sano jir waxay gudbin karaan foomka diiwaangelinta codbixiyaha, diiwaangelintooduna waxay dhaqan geli doontaa maalinta ay gaaraan 18 sano. Minnesota waa hogaamiye qaran dhanka ka qeybgelinta dhalinyarada, waxayna qayb weyn ka tahay in dhalinyarada loo arko inay yihiin codbixiyeyaal mustaqbalka.

CODKA JOOGTADA AH EE GURIGA LAGA CODEEYO

Dad badan oo reer Minnesota ah waxay ku raaxaystaan fudaydka ay ku codeyn karaan guriga iyagoo isticmaalaya warqadda codbixinta maqan. Codbixiye kasta oo u qalma wuu codeyn karaa siyaabahan, laga bilaabo Juun 2024, waxay awoodi doonaan inay codsadaan in lagu daro liiska si si toos ah loogu soo diro warqadda codbixinta inta lagu jiro muddada codbixinta hore, halkii ay mar kale codsan lahaayeen ka hor doorasho kasta. Tani waxay waqti u badbaadin doontaa codbixiyeyaasha ogaada inay doonayaan inay sii wataan codbixinta guriga.

QODOBADA LUUQADDA

Laga bilaabo Janaayo 2024, tilmaamaha codbixinta ee saddexda luuqadood ee aan Ingiriiska ahayn ee ugu badan ayaa laga bixin doonaa dhammaan goobaha codbixinta ee gobolka oo dhan. Helitaanka luuqad dheeraad ah ayaa la bixin doonaa goobaha codbixinta ee u qalma, sida ku xusan xogta tirakoobka.

- Degmooyinka ay ugu yaraan 3% dadka ku hadlaan Ingiriisiga “aan aad u wanaagsanayn” waxay bixin doonaan tilmaamaha codbixinta la turjumay iyo warqadaha codbixinta tusaalaha ah.
- Degmooyinka ay ugu yaraan 20% dadka ku hadlaan Ingiriisiga “aan aad u wanaagsanayn” ayaa, marka la codsado, bixin doona adeegyada tarjumaadda degmadooda Maalinta Doorashada. Codbixiyeyaashu sidoo kale waxay gudbin karaan codsi ay ku qoran yihiin ugu yaraan 10 saxiix oo ka yimid codbixiyeyaasha u qalma ee degmadooda



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.gov/somali • 1-877-600-VOTE